San Diego City Schools

Fact Sheet

Xilliga Dayrta 2003

Nidaamka Iskaa-wax-u-qabsada oo kooban

Nidaamka Maamulka ee tirisigiisu yahay 4595 ee San Diego City Schools wuxuu qofka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya ku qeexayaa inuu yahay "qof si joogto ah dugsiyada iyo goobaha waxbarashadda uga shaqeeya oo kaalmeeya shaqaalaha xirfada leh." Dadka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya lama siiyo wax mag-dhaw ah ama manaafacaadka shaqaalaha la siiyo, marka laga reebo mag-dhawga shaqaalaha sida ku cad Qoddobka Sharciga ee Shaqada 3364.5.

Oggolaanshaha qofka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeynaya waxaa go'aankeeda ikhtiyaar u leh maamule kasta iyo Agaasimaha Xidhiidhka Jaaliyada, kaas oo ujeeddooyinka, iyo tilmaamaha, isla mar ahaantaasna, dhammaan hawlaha barnaamijyada iskaa-wax-u-qabsada ee dugsiyada soo dejiya. Oggolaanshaha qofka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeynaya waxyaabaha uu ku salleysan yahay waxaa ka mid ah qoddobadan, laakiin aan ku xadidneyn, kuwan soo socda:

- Waa inaan dembi weyn lagu xukumin ama sida sharciga California uu qoreyo uusan ahayn qof fara-xumeyn u geystay qof kale.
- Arji dhammeystiran oo ah iskaa-wax-u-qabsada waa inuu faylka ku jiraa.
- Waa inuusan qaaxo (TB) qabin.
- Waa inuu dad la dhaqan wanaagsan leeyahay, xiiseynayaana la shaqeynta carruurta.
- Waa inuu awood u leeyahay inuu si wadajir ah shaqaalaha ula shaqeyn karo.
- Waa inuu dadka si wanaagsan ula xidhiidhi karaa.
- Waa inuu si joogto ah u awoodi karaa, rabitaana muujiyaa inuu ka qeybgalayo.

Maamulaha dugsi kasta wuxuu shaqaalaha kala tashaneyaa inay go'aanka ah ilaa heerka loo baahan yahay in la qaato dad iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya, wuxuu kaloo magacaabeyaa iskuduwaha dadka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya (awoodaas oo kale leh), marka loo baahdana rikoodhka taariikheed ee qofka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeynaya Maxkamada Sare ee Xusuus-dhiga Dembiyada ka soo baadha. **Baadhitaanka taariikhda dembiyada qofka wuxuu muujineyaa Gobolka San Diego oo keliya. Dadka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeynaya loogama baahna in taarikhdooda la soo baadho;** go'aanka ah in baadhitaan dheer qofka lagu sameeyo waa arrin shakhsiyeed oo ku xidhan hadba qofka hawsha loo direyo.

OO KOOBAN

- Iskuduweyaasha goobaha ee dadka iskaa-wax-u-qabso oo tababaran ayaa maamuleya dadka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeynaya.
- Dadka raba inay iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeyaan waa inay soo codsadaan, waxaana laga baadheyaa cudurka qaaxada
- Dugsiyadu waxaa laga yaabaa inay maxkamada Sare ka soo baadhaan qofkaasu inuu demiile yahay iyo in kale, waxay kaloo dadka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeynaya warsan karaan inay faraha iska soo qaadaan.
- Inta sannad-dugsiyeedku uu socda waxaa tababar la siineyaa iskuduweyaasha dadka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya.

Sannadka 2002-2003:

- In ka badan 23,000 oo qof ayaa iskaa-wax-u-qabso kaga shaqeeya SDCS
- In ka badan 650,000 oo saacadood ayaa iskaa-wax-u-qabso lagu shaqeeyey
- Qiyaastii 70% waxay dadka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya ka hawlgaleen fasalka dhexdiisa

Maamuleyaashu waxay dadka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeyaan raba u direyaan inay faraha iska soo qaadaan (dugsiga ayaa kharashka bixineya), waa marka ay habboon tahay. **Dadka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeynaya loogama baahna inay faraha iska soo qaadaan**; go'aanka ah in qofka loo diro inuu faraha iska soo qaado waa arrin shakhsiyeed oo ku xidhan hadba qofkaas hawsha loo direyo. Qeybta Adeegyada Booliiska Dugsiyada ee Makiinada faraha lagu baadho haysta ayaa baadheya. Haddii natiijada ka soo baxda ay sheegeyso inuusan dembiyo hore lahayn, Booliiska Dugsiyada ayaa la xidhiidhaya iskuduwaha dadka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya, kedibna qofkaasu wuxuu bilaabeyaa hawshii loo direy. Haddii Qeybta Makiinada faraha wax ku baadha ay ku arkaan inay Waaxda Caddaaladu dembiyo ku xukuntey, natiijadaas waxaa loo gudbineyaa Qeybta Adeegyada Dadweynaha si ay dib ugu eegaan. Waxayna waxbarashadda degmadu go'aan ka gaadheysaa in qofka hawsha loo oggolaado iyo in kale. Waaxda Adeegada Dadweynuhu waxay iskuduwaha dadka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya la socodsiineysaa in qofkaas loo oggol yahay shaqada iyo in kale, kedibna iskuduwaha dadka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya ayaa qofkii u gudbineya go'aankii Waaxda Adeegyada Dadweynaha.

Dhammaan dadka raba inay iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeyaan waa inay soo buuxiyaan Arjiga San Diego City Schools (SDCS) ee dadka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeynaya iyo kaadhka baadhitaanka TB oo dhammeystiran. (eeg Nidaamka Maamulka SDCS ee tirsigiisu yahay 7065). Qofka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya wuxuu xaq u leeyahay in kalkaaliye caafimaad oo sidata shahaado la aqoonsan yahay ay lacag la'aan maqaarkiisa TB ka baadho, waana inuusan cudurkaas TB qabin. Warqadda shahaadada ah ee ka marag-kacaysa inaadan cudurkaas qabin waa in afartii sannaba mar la soo cusbooneysiiyaa. Nidaamkanu wuxuu la mid yahay nidaamka dhammaan shaqaalaha waxbarashdda degmada qabaneya.

Dhammaan hawlaha iskaa-wax-u-qabso lagu qabaneyo waxaa sheegaya macallinka, iskuduwaha dadka iskaa-wax-u-qabso dugsiga kaga shaqeeya, ama maamulaha ama maamule ku-xigeenka, kuwaas oo lagu soo tababarey Waaxda Xidhiidhada Jaaliyada. Dadka iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya waa inay adeecaan nidaamka warqadda la saxiixayo marka shaqada la soo galeyo.

SOMALI VERSION: SUMMARY OF VOLUNTEER PROCEDURE FALL 2003

Warbixinada kala xidhiidh: Barnaamijka Iskaa-wax-u-qabso ee Waaxda Xidhiidhada Jaaliyada: (619) 725-5597
Su'aalaha warbaahinta: (619) 725-5578 **www.sandi.net/partners**

San Diego City Schools(SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 140,000 oo ardey, waxayna leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo 17,000 oo shaqaale ah. DMS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageerto dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsaneysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.

"Ujeeddada San Diego City Schools waxaa weeyaan inay ardeydu guul ka gaadhaan waxbarashadda, waxaana laga taageeri doonaa xaga wax dhigista iyo waxbarashadda fasalka dhexdiisa ah."